

WARQADDA WARGELINTA WAALIDKA-WAKIILKA NAEP EE 2026

[SCHOOL LETTERHEAD]

[DATE]

Waalidka ama Wakiillka Qaaliga ah:

[SCHOOL NAME] waxa loo doortay inuu ka qaybqaato Qiimaynta Qaranka ee Horumarka Waxbarasho (NAEP), oo ay ku qaadayso Xarunta Qaranka ee Istaatistigiska Waxbarashada gudaha Waaxda Waxbarashada, markay tahay [DATE]. NAEP waxa ku jira qiimayno Akhriska iyo Xisaabta ee Fasalada 4 iyo 8. Natiijooyinka waxa loo shaaciyaa iyagoo ah Kaararka Warbixinta Qaranka, xogta lagu ururiyey NAEP na waxa loo isticmaala qaran ahaan iyo isbarbardhigga gobolada labadaba.

NAEP wuxuu ku qaataa qiyaastii 120 daqiiqo marka la eego inta badan ardayda ka qaybqaadanaysa, oo uu ku jiro wakhtiga kala-guurka, tilmaamaha, iyo dhammaystirka su'aalaha xogururinta ee aan waajibka ahayn. **Xogta lagu ururiyo NAEP waxa loo isticmaalaa ujeedooyin istaatistigis oo kaliya.** Dhibcaha ilmahaaga wax saamayn ah ku yeelan waxqabadkiisa NAEP, dugsiyada/ardayda ka qaybqaadanayaana heli maayaan xogtooda waxqabadka NAEP. Arday kasta oo ka qaybqaadanaya waxa laga qaadi hal aag maaddo oo kaliya. Way dhici kartaa in ardayda looga cudurdaar NAEP sabab kasta. Waajib kuma aha inay ka wada shaqeeyaan qiimaynta oo way ka boodi karaan su'aasha ay rabaan.

Qaadista NAEP-ta 2026, ardayda ku sugan dugsiyada haysta aaladaha buuxiyey shuruudaha farsamo ee NAEP ayaa ka qaybqaadan doona qiimaynta iyagoo isticmaalaya aaladaha dugsiyada. Ardayda ku sugan dugsiyada haysta aaladaha aan buuxin shuruudaha farsamo waxay ka qaybqaadan doonaan qiimaynta iyagoo isticmaalaya aalado ay NAEP bixiso.

Marka lagu daro qiimaynta, ardayda ka qaybqaadanaysaa waxay si aan khasab ahayn u buuxin karaan su'aalaha xogururinta NAEP, kuwaasi oo bixiya macluumaad ku saabsan waayoaragnimada waxbarasho ee ardayda iyo fursadaha ay wax kaga bartaan gudaha iyo dibadda fasalka. Macluumaad dheeraad oo ku saabsan su'aalaha xogururinta NAEP waxa laga heli karaa nces.ed.gov/nationsreportcard/parents halka ka hoosaysa "Survey Questionnaires & Your Student: What You Need to Know (Su'aalaha Xogururinta & Ardaygaaga: Waxay Tahay Inaad Ogaato)."

Ma jiro shardi ku xiran ilmahaagu inuu isku diyaariyo NAEP, laakiin fadlan ku dhiirigali ilmahaagu inuu sida ugu fiican u shaqeeyo. Haddii aadan rabin ilmahaagu inuu ka qaybqaato, fadlan sidaas ku muuji qoraal ahaan ugu dambayn [DATE]. Kala xiriir [NAME] lambarka [TELEPHONE #] ama [EMAIL ADDRESS] wixii su'aalo ah.

Mahadsanid,

[SCHOOL PRINCIPAL'S NAME]

Xarunta Qaranka ee Istaatistigiska Waxbarashada (NCES) ayaa samaysa Qiimaynta Qaranka ee Horumarka Waxbarasho (NAEP) si ay u qiimayso barnaamijyada waxbarashada ee fadaraalku taageero. Dhammaan macluumaadka aad bixiso waxa kaliya loo isticmaali karaa ujeedooyin cilmibaaris, istaatistigis, iyo qiimayn uu dhigayo Xeerka Dib-u-Habaynta Saynisyada Waxbarashada 2002 (ESRA; 20 U.S.C. § 9543) waxaana dhici karta inaan la shaacin, ama loo isticmaalin qaab lagu aqoonsan karo marka la eego ujeedo kale oo kasta marka laga reebo sida sharcigu dhigayo. Shaqaale NCES oo kasta iyo sidoo kale wakiil NCES oo kasta, sida qandaraaslayaasha iyo isku-duwayaasha NAEP, waa la dhaariyey waxaana ku dhacaya in lagu xukumo xabsi gaaraya ilaa shan sano, ganaax ah \$250,000, ama labadaba, hadday dhacdo inay si ulakac ah u tusaan WIXII ah macluumaad la aqoonsan karo oo kugu saabsan hab aan loo idmin. Gudbinta elektaroonik ahaan ee macluumaadka waxa la socon doona si looga ilaaliyo fayraska, malware-ka, iyo khataraha kale shaqaalaha Fadaraalka iyo qandaraaslayaasha si waafaqsan Xeerka Xoojinta Ammaanka Internetka ee 2015.